

Xeer lamb. 291 ee 29 Oktoobar 1963

Dhismaha Waaxda Saadka Guud ee Dowladda

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 75 iyo 81 iyo faqradda 2 ee qodobka 85 ee Dastuurka.

Kadib markii la arkay qod. 16 iyo 23 ee sharciga lamb 14 ee 3 Juun 1962 ee la xiriira hab dhismeedka Dowladda.

Kadib markii la xusay qod. 4 ee sharciga lamb 316 ee 17 Diseember 1962 oo khuseeya aqbalidda maamulka saadka.

Kadib markii la garwaaqsaday baahidda loo qabo in la helo nidaam dhinaca Waaxda saadka guud ee dowladda, sida iibinta, keydinta iyo qeybinta saadka lagu carifa sharciga lamb 318 ee 18 Disember 1962 oo ay hal hey'ad maamusho.

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha.

Kadib talo soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda.

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Dhismaha Waaxda Saadka Guud ee Dowladda

Laga bilaabo 1 Janaayo 1963 waxaa la dhisay, Waaxda Saadka Guud ee Dowladda oo awood u leh in ay ku adeegto aagaa dalka oo dhan.

Waxaa madax looga dhigaya Waaxdasi Howlwadeen oo gaarsisan darajada A oo hoos yimaado Wasiirka Maaliyadda.

Qod. 2

Howlaha Madaxa Waaxda Saadka Guud ee Dowladda

Madaxa Qaybta Saadka Guud ee Dowladda waxaa laga raba in uu fuliyo howlaha hoos ku qoran:

- a) In uu soo iibiyo, keydiyo kadibna u kala qeybiyo qalabka;
- b) In uu soo iibiyo, ekydiyo kala qeybiyo warqaadaha, qoraallada, qalabka xafiisyada, aaladaha teknikada ah iyo wax allaliyo wixii loo isticmaali karo fulinta howlaha;
- c) In uu guddomo, keydiyo kala qeybiyo qalab kasta.

Qod. 3

Baabi'inta Economato

Laga bilaabo 1 Janaayo 1963 waxaa la baabi'iyey Economato, wixii qalab iyo hanti yiilay waxaa lagu soo wareejin doona Waaxda Saadka Guud ee Dowladda.

Qod. 4

Burin

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka hor imaanaya ama khilaafsan sharcigaa.

Qod. 5
Hirgelinta Sharcigaan

Dekretada waxay hirgeli doonta maalinta ku xigta markii lagu soo daabacay Faafinta Rasmiga waxaana lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee shuruucda iyo dekreetoyinka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la farayaa in cid kasto ay u hoggansanato, una hoggamiso cid kasta.

Muqdisho, 29 Oktoober 1963.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirashid Cali Shermarke

Wasiirka Ku meel gaarka ee Maaliyadda

Abdirashid Cali Shermarke

Waa la arkay waana la diiwan geliyey - diwaan lamb1 bogga 189

Muqdisho, 4 Nofeember 1963.

Xisaabiyaha Guud: **Dr. Ahmed Ali Omar**